Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda
Qoraal Kooban
08
09 | 2014

# Aragtiyada Amniga iyo Garsoorka ee Muqdisho

## Faaqidaadda Daraasad ku Saabsan Amniga iyo Garsoorka oo ay Xarunta OCVP Ka Sameysay Magaalada Muqdisho

### Qodobbada ugu Muhiimsan

- Marka loo barbar dhigo sanadihii hore, dadka Muqdisho waxay qabaan yididiilo guud. Guud ahaan dadku waxay dareemayaan degganaansho ka badan intii hore, maadaama aysan jirin colaado u dhaxeeya qabaa'ilka iyo kooxaha
- Inkastoo uu amnigu si la taaban karo u wanaagsanaaday, haddana waxaa jira arrimo cusub oo amni xumo keena. Qaraxyada is-miidaaminta ah, garneyllada laga tuuro, dilalka qorsheysan iyo khilaafyada xagga dhulka ah ayaa ah walaacyada ugu waaweyn ee shacabka Muqdisho.
- Dadku kuma kalsoona tayada laamaha amniga iyo hufnaanta hay'adaha garsoorka, iyagoo inta badan oday dhaqameedyada u raadsada xallinta khilaafaadka.

### Arar

Caasimadda Soomaaliya ee Muqdisho waxay leedahay taariikh hodan ah oo ka badan 1000 sano. Tan iyo burburkii dowladda sanadkii 1991-gii, waxaa magaalada soo foodsaaray xasillooni darro siyaasadeed, fowdo iyo barakac daba dheeraaday. Nooca colaadda ayaa isbedbedelayay muddo, waxaana lasoo maray colaado ku saleysan beelo iyo hoggaamiye kooxeedyo horraantii 90-meeyadii, maantana waxaa jira dagaal lagula jiro kooxaha mayalka adag. Intii dhibaatooyinku jireen, Muqdisho waxaa lagu sifeeyay inay tahay magaalada ugu khatarta badan dunida.

Xoogagga al-Shabaab waxaa sanadkii 2011-ka magaalada ka saaray ciidanka Dowladda Federaalka Soomaaliya oo gacan ka helaya kuwa Midowga Afrika. Intaas wixii ka dambeeyay, ma jirin dagaallo toos ah oo magaalada dhexdeeda ka socda. Bishii September sanadkii 2012-kii, dowladihii ku meel gaarka ahaa waxaa beddeshay dowlad rasmi ah oo loo idmaday inay dalka xasiliso. Bishii Maarso sanadka 2014-ka, guddoomiyihii Maxkamadda Millatariga, Gen. Xasan Maxamud Xuseen "Muungaab" ayaa loo magacaabay inuu noqdo Duqa Caasimadda, si uu amni xumada wax uga qabto.

Inkastoo ay isbedello xoog leh ka dhaceen magaalada saddexdii sano ee lasoo dhaafay, wali waxaa jira walaac laga qabo amniga, garsoorka iyo kartida dowladda. Sidaas oo ay tahay, dadka Muqdisho waa kuwa rajo fiican ka qaba mustaqbalka.

### Habka daraasadda loo sameeyay

Faaqidaadda qoraalkan iyo talooyinku waxay ku saleysan yihiin daraasad ballaaran oo ay hey'adda OCVP Muqdisho ka sameysay intii u dhaxeysay 26-kii February iyo 24-kii March. Waxaa la wareystay 1,664 qof oo kasoo kala jeeda 17-ka degmo ee Xamar. Magaalada waxaa loo qaybiyey afarta qaybood ee ay hey'adaha amnigu u qaybiyaan, kuwaas oo kala ah:

**Qabta Galbeed oo ay ku jiraan degmooyinka:** Dayniile, Wadajir iyo Dharkeenleey

**Qabta Dhexe:** Xamar Weyne, Shangaani, Warta Nabadda, C/Caziiz iyo Boondheere

**Qaybta Bari:** Kaaraan, Yaakhshiid, Heliwaa iyo Shibis

**Qaybta Waliyow Caddow:** Xamar Jajab, Waaberi, Howl-Wadaag iyo Hodan

Daraasaddu waxay raacday habka isku dhafka

**Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda** waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay.

Xarunta **OCVP** waa mid madax bannaan, aan siyaasi aheyn, aan macaasho doon aheyn, hadafkeeduna waa qabanqaabinta iyo taageeridda dadaallada u adeegaya nabadda, amniga iyo horumarka dhammaan gobollada Soomaaliya iyo Somaliland

hannaanka cilmi-baarista, kaas oo ka kooban afti laga uruuriyey guryaha 17-ka degmo, doodo loo qabtay qaybaha bulshada iyo wareysiyo lala yeeshay hal-doorka bulshada.

Ujeeddada qoraalkan waa in xogta la uruuriyay lagala soo dhex boxo walaaca xagga amnig ah iyo midka dowladnimo ee ay shacabka Muqdisho qabaan. Faallada qoraalkan waxay isugu jirtaa mid lagala soo dhex baxay aftidii la uruuriyay iyo kulammadii lala yeeshay qaybaha kala duwan ee bulshada iyo wareysiyadii hal-doorka. Rajadu waxay tahay in natiijada daraasaddan ay xog muhiim ah ku biiriso dadka jaan-gooya siyaasadda iyo maamulka Muqdisho.

## Sababaha iyo Saameynta

**"Dagaalladii ay Muqdisho caanka ku aheyd labaatankii sano ee lasoo dhaafay ma muuqdaan hadda..."**

**"Saboolnimo ba'an iyo dhaqaalihii oo dad gaar ah gacantiisa ku uruuray ayaa dhallinyarada ku horseedaya fal dambiyeedyada..."**

**"Ganacsato ayaa joogta dagmadeenna taasina waxay na siisaa dareen amni..."**

Marka dadka Muqdisho la waydiiyay dareenkooda xagga amniga sanadkan marka loo barbar dhigo sanadkii hore, inta badan waxay sheegeen in xaaladda amnigu aad uga wanaagsan tahay sanadkii hore. Walaaca amnigu aad buu isku beddelay. Dadku waxay sheegeen inuu hoos-u-dhac ku yimid dagaalladii waaweynaa ee u dhaxeyn jiray qabaa'ilka iyo kuwii u dhaxeeyay dowladda iyo kooxaha hubeysan sida al-Shabaab.

Inkastoo horumar la taaban karo la sameeyay, wali waxaa jira walaac guud oo laga qabo amni xumo guud, taas oo ay astaan u tahay hababka ay dhawaantan al-Shabaab u dagaallameysay (qaraxyo & dilal qorsheysan), iyo sida ay dadka qaar uga faa'iideystaan daciifnimada awoodda sharciga.

Kala shakiga qabaa'ilku waa mid wali horseeda amni xumada qaybo kamid ah Muqdisho. Qaybta Waliyow Cadde, tusaale ahaan, dadka waxay sheegeen in xurguf u dhaxeysa qabaa'ilka ay keento amni darro. Meelaha ay xiisadda qabaa'ilku ka kacsan tahay waxaa ku badan guryaha xoogga la isaga saaro, xadgudub xagga jinsiga ah iyo baad.

Waxaa la isku raacsan tahay in degmooyinka qaar—sida Dayniile iyo Heliwaa--- ay ka amni xun yihiin kuwa kale, balse waxaa sidoo kale la isku raacsan tahay in hababka dagaal ee ay al-Shabaab lasoo ifbaxday ay yihiin sababaha ugu badan ee keena amni xumada iyo baqdinta shacabka Muqdisho.

Bilihii ugu dambeeyay, waxaa baqdinta shacabka sii kordhiyey dilalka qorsheysan ee lala beegsanayo dadka dowladda la shaqeeya. Waxaa kaloo jira amni darro iyo baqdin ka dhalata kala sarreynta dhaqaale ee bulshada, iyadoo ay jiraan kooxo summad-laawayaal ah oo hubka si fudud ku heli kara.

Khilaafyada ku saabsan dhulalka ayaa iyana sii badanaya, waxaana sababay sare u kaca dadka dalka kusoo laabanaya, waxaana arrintan sii hurinaya iyadoo aysan jirin hey'ado dowli ah oo si abaabulan ula tacaala maareynta dhulka, iyo iyadoo aysan shacabku kalsooni ku qabin hannaanka garsoorka. Maamulka Gobolka Benadir wuxuu ku ammaanan yahay inuu sameeyay guddi xalliya khilaafaadka dhulalka, balse culeyska arrintan waa mid u baahan in si heer federaal ah loo abbaaro.

Cabsiyada xagga amniga ah ee haysta shacabka Muqdisho waxay u muuqdaan kuwa iskaabaya iskuna xiran. Dadka intooda badan waxay isku raacsan yihiin inuu xiriir ka dhaxeeyo xaaladda bulsho, midda dhaqaale iyo fal-dambiyeedyada. Shaqo la'aanta baahsan, gaar ahaan xagga dhallinyarada, ayaa si weyn loogu arkaa inay sabab iyo natiija-ba u tahay amni darrada. Amni xumadu waxay inta badan horseeddaa saboolnimo, taas oo markaas iyana horseedda in dhallinyaradu ay u nuglaadaan gacan haatinta al-Shabaab, iyagoo noqda kuwa u ruufiyaana si ay lacag ugu helaan, amaba xubno ka noqda.

Saameynta dhaqaale ee amni xumada waa mid iyaduna isku soo laabata. Baqdinta iyo amni xumadu waxay caqabad ku noqdaan dhaqdhaqaaqa dhaqaale. Ganacsatadu way ka hayaamaan xaafadaha loo arko in amnigoodu liito, arrintaas oo keenta aagag dhan oo sharci uusan ka jirin. Dhanka kale, markii uu amnigu wanaagsanaado waxaa kordha kalsoonida ganacsatada iyo dhaqdhaqaaqa guud ee dhaqaale, taas oo iyana horseedda dareen amni.

Dadka Muqdisho waxay su'aalo badan ka keeneen kartida maamullada heer degmo. Degmooyin badan waxaa jira wacyi la'aan ku saabsan adeegyada ay degmadu bixiso. Maamulka degmooyinka qaar waxaa loo arkaa inaysan matalin dadka deegaanka. Mararka qaar, waxaaba dhacda in dadka deegaanka qaarkood aaney ka warqabin inuu maamul-ba jiro. Tani waxay muujineysaa in maamuka degmooyinka ay ka mararka qaar ka gaabiyaan inay bulshada ay u adeegaan si toos ah ula xiriiraan.

Dadka qaarkood waxay sheegeen inay jiraan dadaallo lagu naalloon karo oo ay kamid yihiin in degmooyinka qaar ay carruurtoodu helaan waxbarasho aasaasi ah oo bilaash ah. Balse qaar badan waxay ka dacwoodeen in adeegyada aasaasiga ah badankood, sida biyaha, korontada iyo caafimaadka ay noqdeen kuwa qaali ah. Dadka Muqdisho waxay ka siman yihiin himillada ah inay si dimoqraadi ah u doortaan hoggaankooda, isla markaana la xisaabtamaan.

## Hey'adaha Amniga

**"Mararka qaarkood, waxaan aragnaa rag dharka millatariga xiran oo fal-dambiyeed sameynaya. Waxaan ka shakinnaa inay wali ka tirsan yihiin ciidanka iyo inkale... "**

Walaacyada badan ee ay shacabka Muqdisho qabaan waxaa ugu sii daran midka ay ka qabaan hey'adaha u xilsaaran amniga iyo kala dambeynta. Dadka waxay u arkaan inuu liito isku xirka hey'adaha amniga, sida Booliiska, Nabad-Sugidda, Ciidanka Xoogga Dalka iyo AMISOM. Dadka deggan Qaybta Galbeed waxay sheegeen in mararka qaar ay AMISOM iyo hey'adaha Soomaalida midkood ay isla fuliyaan howlgallo aysan la socon maamulka degmada iyo xitaa booliiska.

Dadaalka ay hey'adaha amnigu wadaan waxaa marar badan wiiqa iyadoo dadka deegaanka aysan u kala caddeyn kaalimohooda iyo masuuliyadohooda. Mararka qaar, dadka deegaanka waxaa ku adkaata inay kala saaraan hey'adaha amniga ee dowladda, shirkadaha amniga ee gaarka loo leeyahay iyo mooryaanta.

Dadka Muqdisho waxay ka gaaraabeen culeysyada iyo caqabadaha heysta booliiska, balse waxay sheegeen inay tiradoodu aad u yar tahay, mushaarkooduna liito, taas oo ku horseedi karta musuqmaasuq. Sidaas darteed, waxaa jira kalsooni xumo ballaaran oo lagu qabo booliiska.

Kalsooni xumada lagu qabo hey'adaha amniga darteed, qaar badan oo dadka magaalada kamid ah waxay door bidaan inay amuurahooda siyaabo aan rasmi ah ku dhammeystaan. Tusaale ahaan Qaybta Bari, 66% dadka la wareystay waxay sheegeen inay odayaasha dhaqanka kala macaamilaan arrimaha amniga gaar ahaan xagga dacwooyinka madaniga ah. 7% oo kaliya ayaa booliiska dacwooyinkooda u gudbista.

Dadka la wareystay ayaa sheegay in oday dhaqameedyadu ay yihiin kuwa tixgalin ku dhex leh bulshada, isla markaana si dhib yar loo heli karo. Dadka deggan Qaybta Dhexe waxay sidoo kale muujiyeen inaysan kalsooni ku qabin booliiska, marka ay tabinayaan dambiyada yaryar. Balse marka ay timaaddo dambiyada waaweyn, 31% waxay u tabiyeen booliiska, halka 18% oo kaliya ay oday dhaqameedyada u tabiyeen.

Daraasaddan waxay kaloo muujisay in marka laga hadlayo dhexdhexaadnimo, dadku waxay hey'adaha amniga ee Soomaalida uga kalsooni badnaayeen AMISOM. Doodaha loo qabtay bulshada qaybaheeda waxaa kasoo baxday in xasaasiyadda ay qabaa'ilku kala qabaan darteed ciidamada amniga, gaar ahaan Xoogga Dalka (millatariga) in loo arko kuwa aan dhexdhexaad aheyn, gaar ahaan marka ay la tacaalayaan dagaallo beeleed.

## Garsoorka

**"Sidee ayaad caddaalad uga fili kartaa, garsoore, aan bixin kharashkii biyaha, korontada iyo kiradii?"**

**"Haddii qofka dhibbanaha ahi kasoo jeedo beelaha laga badan yahay, markaa waxaa lagu yiraahdaa: afar faataxo ka qaado dhibkaaga..."**

Garsoorka dowladda waxaa guud ahaan laga aaminsan yahay in ay haystaan caqabado la nooc ah kuwa haysta hay'adaha ammaanka. Cilmibaaristu waxa ay muujineysaa in garsoorku uu ku naafoobey sanado colaado ah aanuna haysan kalsoonida bulshada.

Sababo la xiriira maqnaanta awood, aqoon iyo agab, garsoorka dowladdu waxa uu u eg yahay mid liicsan oo shafka dhulka ku haya. Arrimaha muhiimka ah ee -- dhex-dhexaadnimo iyo lahaanshaha awood iyo karti sharciga lagu fuliyo – shacabka Muqdisho waxa uu arkaa in garsoorku uu yahay mid liita, taas oo keentay in dad badan ay garsoor u doontaan meelo aan ahayn garsoorka dowladda.

Welwelka dadweynaha ka qayb qaatay cilmibaaristan waxa uu salka ku hayaa, aaminaadda ay shacabku aaminsan yihiin in garsoorka dowladdu aanu lahayn hufnaanta iyo fiyoobida daruuriga u ah garsoor, sharciyada iyo xeerarka garsoorkuna aanu qaban ama aanu garsoorku qudhiisu ku dhaqmin. Waxyaabaha lagu sababeeyey kalsooni darrada ka jirta garsoorka waxaa ka mid ah, xirfad darro dhanka garsoorayaasha ah, mushaar aan la bixin ama lala soo daaho iyo cabsi ay garsoorayaashu ka cabsi qabaan in laga aarguto.

Shacabku waxa ay inta badan maxkamadaha ku matalaan taleefonada hadba intii lacag lagu shubo lagu hadli karo ee loo yaqaan 'fadlan lacag ku shubo' iyaga oo muujinaya musuqmaasuqa ballaaran ee ku baahsan dhammaan hannaanka iyo heerarka loo maro garsoorka.

Qaybta Waliyow Cadde, dadweynuhu waxa ay sheegeen in garsoorayaashu ay inta badan la kulmaan gacan ka hadal, haddii dadka dacwadda ku jira aysan jeclaysan go'aanka maxkamadda. In badan oo dadkaas kamid ah waxa ay tilmaameen in arrintaas ay caqabad ku noqon karto dhaqan-galka sharciga. Dadka ku nool Qaybta Dhexe, kalsoonida ay ku qabaan garsoorka dowladda waa ay ka soo wanaagsanaatey sidii ay ahayd sanadkii hore.

Dadkii cilmibaaristu koox kooxda u waraysatay, iyo kuwa gooni goonida loo su'aalayba, waxay tilmaameen in garsoorka ay ka dhex muuqato qabyaalad, iyada oo qabaa'ilka awoodda lehna ay aargutaan, kuwa tabarta yar ama kasoo jeeda qabiillada laga tirada badan yahayna, ay ku khasbanaadaan in ay aqbalaan sida xaalku yahay.

Marka la eego dareennada ama xogta kore, caqabadaha haysta hay'adaha garsoorka kuma eka oo kaliya tabar darri dhaqaale ama falfal xumo kale sida musuq-maasuqa, balse waa caqabado mug weyn oo salka ku haya hannaanka maamulka dowliga ah. Warbixintu waxa ay muujinaysaa, in aysan kalsooni ku qabin shacabku, garsoorka oo ah mid kamid ah hay'adaha ugu muhiimsan maamulka dowladda.

Qaybta Bari, 13%, oo kaliya, dadka su'aalaha daraasadda ka jawaabey, ayaa kalsooni ku qaba maxkamadaha marka la barbar dhigo dadka ku kalsoon odayaasha dhaqanka oo ah 48% ama kuwa kalsoonida ku qaba culumada diinta oo ah 29%. Shacabka ku nool Qaybta Dhexe, dorashada ay odayaasha dhaqanka ku tilmaameen kuwa loogu kalsooni badnaan karo dhinacyada garsoorka ka shaqeeya, waxa ay ku sababeeyeen: xaqsoorka ama caddaaladda oo ah sababta ugu badan oo ay xuseen 49%, ayna ku xigtay fududaanta inay xaajada galaan iyo inay xor ka yihiin siyaasad, taas oo ay tilmaameen 15%.

## Gunaanad

Hay'adaha amniga iyo kuwa garsoorka ee Muqdisho waxaa ragaadiyey culayso fara badan oo is-fan-gashan, ayna ka mid yihiin: itaal darro dhaqaale iyo mid aqooneed iyo kalsooni darro lagu qabo hay'adahaas. Taasina waxay keentay in dadka Muqdisho aanay kalsooni ku qabin adeegyada hay'aaha

amniga iyo kuwa garsoorka, umana badna inay isku halleeyaan, iyaga oo dhanka kale miciin biday, hababka aan dowliga ahayn si ay u helaan amni iyo caddaalad.

Haddii hadafku yahay in shacabka Muqdisho ay aaminaan hay'adaha dowliga ah, waxaa lagama maarmaan ah in la helo hannaan cusub oo lagu hirgelinayo ammaanka iyo garsoorka. Hannaankaasina waa inuu noqdo mid dhinacyo badan ka kooban, xalna u helaya caqabadaha ka jira dhanka dhaqaalaha, awoodda iyo kalsoonida. Haddii aan la xallin walaaca kusaabsan qabyaaladda, qoondaynta dhaqaale iyo xoojinta hababka shaqada iyo hirgelinta mushaar la isku hallayn karo, kuna filan shaqaalaha dowladda, arrimahaas kaligood kuma filna inay xal noqdaan.

Isbaddel in la helo iyo in xaaladda la wanaajiyo waxay u baahan tahay wakhti, iyo in dhinacyo badan oo hawshu khusayso ay kaalintooda qaataan iyo inay sii socoto taageerada bulshada caalamka. Tallaabooyin badan oo xaaladda wanaajin kara ama isbaddel keeni kara waxaa horay loogu xusay qorshayaasha Guddiga Amniga Qaranka, Guddiga Qaranka ee Adeegga Garsoorka, Guddiga La-Dagaalanka Musuqmaasuqa. Gaabiska ay dowladdani ka gaabisay samaynta guddiyadaas, iyada oo laba sano talinaysay, waa arrin aan hobboonayn. Si arrintaas xal loogu helana, waa lagama maarmaan in la laban-laabo, dadaallada dhammaan inta talada wax ku leh.

## Talooyin

Muddada soke, Dowladda Federaalka ah iyo Maamulka Gobolka Benadir waxaan usoo jeedin laheyn inay tixgaliyaan qodobbada soo socda:

**Isku Xirka Hey'adaha Amniga:** Tallaabooyinka ay dowladdu qaadday ee isku xirka laamaha kala duwan uma muuqdaan kuwa si qumaati ah u shaqeynaya. Talooyin qoto-dheer waxay ka imaan karaan haddii qiimeyn madax bannaan oo lagu sameeyo Xarunta Howl-gallada Wadajirka ah (Joint Operations Center), taas oo ah unugga isku xira hey'adaha amniga. Waa in la helaa hannaan ay hey'aduhu xogta ku wadaagi karaan, taasina waxay u baahan tahay inay dhammaantood iskaashadaan si natiijo wax ku ool ah loo helo.

**Wacyi Galin Bulsho:** Waxaa lagama maarmaan ah in dowladdu ay sameyso olole ballaaran oo wacyi galin bulsho ah, kaas oo shacabka lagu wargalinayo tallaabooyinka ay dowladdu qaadeyso si ay ula tacaasho amni darrada. Taasi waxay kordhineysaa ogaalka iyo kalsoonida shacabka ee heerarka kala duwan ee dowladda, sida degmada, gobolka iyo federaalka. Xogta shacabka la siinayo waa inay ku jirtaa sida ay tahay inay usoo tabiyaan falalka amni xumada iyo tallaabooyinka ay dowladda ka fili karaan, iyo waliba tallaabooyinka ay shacabka qaadi karaan haddii natiijadii la filayay ay soo bixi waydo. Waxaana habboon in ololahan loo isticmaalo ilaha kala duwan ee warbaahinta, gaar ahaan raadiyayaasha iyo tabeellooyinka.

**Kaalinta Odayaasha Dhaqanka:** Intii aysan dowladdii millatariga aheyd burburin, odayaasha dhaqanku kaalin rasmi ah ayay ku lahaayeen degmooyinka Muqdisho. Casharrada laga baran karo Aqalka Guurtida Somaliland waxaa kamid ah kaalinta wanaagsan ee ay odayaasha dhaqanku ciyaari karaan marka masuuliyaddooda la rasmiyeeyo, iyadoo la isku dhafayo habka dowladnimo ee casriga ah iyo midka dhaqanka. Marka la eego kalsoonida ay odayaasha dhaqanku ka haystaan shacabka marka loo barbar dhigo maamulka degmooyinka, waxay u badan tahay in rasmiyeynta kaalintoodu ay isku soo dhaweyn karto shacabka iyo maamulka degmooyinka. Maadaama aysan shacabku hadda dooran hoggaankooda, rasmiyeynta kaalinta odayaasha dhaqanku waxay kordhineysaa dareenka ay shacabku u qabaan in si dhab ah loo matalo, ayna la xisaabtami karaan maamulka.

**Dimoqraadiyeynta Muqdisho:** Dadkii ka qayb galay daraasaddan waxay caddeeyeen inay jeclaan lahaayeen inay doortaan hoggaamiyayaashooda. Ballanta uu Guddoomiye Muungaab ku bixiyey inuu xafiiska ku wareejin doono maamul la doortay waa mid dhiirri galin leh. Hoggaamiyayaasha sida dimoqraadiga ah loo soo doortay waxay yeelan doonaan awoodo aad u ballaaran oo siyaasadeed, kuwa sharci iyo kuwa bulsho, awoodahaas oo ay kula dagaallami karaan musuqmaasuqa ragaadiyay caasimadda, amnigana wax uga qaban karaan.

Waxaa lagama maarmaan ah in shacabka Muqdisho ay xuquuqdooda muwaadinnimo si nabad iyo tixgalin leh u raadsadaan inta ay ka helayaan. Dastuurka Qabyada ah wuxuu si cad u qeexaya in muwaadiniintu ay xaq u leeyihiin amni (Qodobka 15-aad) iyo maamul cadaalad ah (qodobka 33-aad).

Sidoo kale, Dastuurka Qabyada ah wuxuu qeexayaa masuuliyadda muwaadinka (qodobka 42) taasoo ah "inuu dhiirri galiyo isla xisaabtan iyo awoodda sharciga". Culeysyada Muqdisho ka jira waxay u baahan yihiin in dadku ay la shaqeeyaan maamulka, u sabraan balse si aan gabbaad laheyn u dalbadaan in isbeddel lagu sameeyo xaaladdooda.

Qoraalkan wuxuu ku saleysan yahay cilmi-baaris ay hey'adda OCVP ka sameysay horraantii Muqdisho.

Akhristayaasha waxaa la ogeysiinayaa inay dibu daabici karaan qoraalkan, haddii aaney ka ganacsaneyn. Maadaama uu Machadka Heritage leeyahay xuquuqda qoraalka, waxaa laga codsanayaa ciddii dibu u daabacda inay xusto Heritage, isla markaana Machadka lasoo socodsiiso.

**© Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda. Qoraalkan wuxuu lagu daabacay hannaanka Creative Commons Attribution, qaybtiisa aan macaash-doonka aheyn (CC BY-NC 3.0)**